# *Guudmarka Dib u Furitaanka Dugsiyada Washington 2020: Tilmaamaha Waxbarashada Gaarka ah*

Guudmarkan *Dib u Furitaanka Dugsiyada Washington 2020: Tilmaamaha Waxbarahsada Gaarka ah* waxay ka caawinaysaa qoysaska ardayda laxaadka la' inay ogaadaan waxa ay filan karaan marka dugsiyada dib loo furo. Waxa ay sidoo kale ka caawinaysaa qoysaska inay gaadhaan go'aamada ardaydooda. Macluumaadka waxa uu leeyahay khidado warbarasahda online ah, fasalka dhaxdiisa ama isku dar labadaba ah.

## Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah ee Dib u Furitaanka Dugsiyada Washington 2020

### Qorshaynta Nuxurka si la Iskula Eego

Tilmaamahan waxaa loo qoray si dugsiyada ay uga caawiso dib u furitaanka iyo inay bixiyaan adeegyada waxbarashada gaarka ah. Adeegyada waxaa lagu bixin karaa online ahaan, fasalka dhaxdiisa, ama iyada oo la isku darayo labadaba.

### Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah ee Dib u Furitaanka Dugsiyada Washington 2020

- Foomku waxa uu leeyahay su'aalo kugu hagaya wada shaqaynta qoyska, helitaanka luuqada, iyo teknooloojiyada. Waxa sidoo kale jira su'aalo taageerada ardayda iyo shaqaalaha.
- Foomku waxa uu sidoo kale leeyahay qorshe, wakhtiga iyo sida kooxdu u qiyaasayso guusha meelaha laga gaadhay.

### Baahiyaha Adeegyada Kasoo Kabashada ee uu keeney Xidhitaanka Xarumaha Dugsiga COVID-19

- Kuwani waa adeegyo dheeraad ah oo loogu talo geley ardayda laxaadka la' marka dugsiyada dib loo furo. Dhamaan ardaydu uma wada baahna adeegyada dheeraadka ah.
- Kooxuhu waa inay sheegaan baahiyaha ardayda ee dugsiga uga maqnaa oo ka maqnaa adeegyada dayrta 2020.
- Adeegyada kasoo kabashada waxaa lagu bixin karaa meel ka baxsan dugsiga ama maalinta waxbarasho.



Washington Office of Superintendent of PUBLIC INSTRUCTION

### Eegitaanka Shaqaalaysiinta

- Ku tobobar dhamaan shaqaalaha sida loo taageerayo ardayda laxaadka la'. Ku tobobar shaqaalaha sida loo isticmaalayo teknooloojiyada.
- Ku tobobar shaqaalaha sida loo dalabado loona shaqeeyo turjubaada.
- Waxa aad xaqiijisaa in dhamaan shaqaaluhu ay garanayaan sida loo dalbado taageerooyinka caafimaadka maskaxda ee ardayda iyo shaqaalaha. Waxa aad samaysaa qorshe aad ku taageereyso ardayda marka macalinku uu xanuun ku maqan yahay.

## Waxa aad KU Dartaa Wax La Taaban Karo Oo Ah Qaab Sii Socda Dib U Furka Dugsiga Kadib

### Wada Shaqaynta iyo Xidhiidhka Qoyska

- Dugsiyadu waa inay kala shaqeeyaan qoysaska ka taageerida ardayga baahan inta uu guriga joogo iyo dhismaha dugsiga dhaxdiisa.
- Waxa aad xaqiijisaa in dhamaan shaqaaluhu garanayaan sida midab takoorka, eexda iyo jahwareerku u saamayn karo ardayda qabta laxaad la'aanta iyo qoysaskooda.
- Dugsiyadu waa inay usoo bandhigaan wax qaab qoyska waxtar u leh. Xidhiidhku waa in loo adeegsadaa luuqada guriga lagaga hadlo.
- Dugsigu waa inay isku dayaan ilaa inta ay la xidhiidhayaan dhamaan qoysaska.
- Qoysaska qaba walaaca waa inay la xidhiidhaan dugsigooda iyo/ama degmada.

### Wada Shaqaynta Ardayga, Dareenka Bulshada, iyo Taageerada Habdhaqanka

- Dugsiyadu waa inay dhamaan ardayda ka caawiyaan sidii ay u buuxin lahaayeen baahiyahooda bulsho, dareen, iyo habdhaqan.
- Si loo xaqiijiyo in dhamaan shaqaalaha ay garanayaan sida loo caawiyo ardayda iyada oo sidoo kalena la qadarinayo dhaqankooda ka duwan.
- In la xaqiijiyo in dhamaan shaqaaluhu ay garanayaan sida loo caawiyo ardayda uu jahwareerku ku dhacay.

### Tilmaamaha Bixinta iyo Qaabka Caalamiga ah ee Loosii Wadayo Waxbarashada

- Dhamaan shaqaaluhu waa inay la shaqeeyaan macalimiinta waxbarashada gaarka ah si ay uga caawiyaan ardayda laxaadka la'.
- Dhamaan ardayda iyo qoysaska waa inay helaan waraaqaha duruusta online-ka ah iyo jadwalaooda. Jadwalka online ahi waa inuu dabacsanaadaa.

- Ardaydu waa inay helaan hoy iyo taageero online ah iyo mid fasalka dhaxdiisa ah.

## Adeegyada Waxbarahsada Gaarka ah ee Inta Dib Loo Furayo Dugsiga oo Dhan

### Qiimaynta iyo U Qalanka

- Kooxuhu waa inay la socdaan hormarka dhamaan ardayda si ay uga taageeraan waxbarashada iyo habdhaqanka.
- Degmooyinka dugsigu waa inay heshaa oo ay taageertaa ardayda laxaadka la'. Nidaamka waxaa loo yaqaan helitaanka ilmaha.
- Kooxdu waxay kala hadlaysaa qoysaska baahiyaha ardayda ee dugsiyada iyo guriga. Kooxdu waa inay sidoo kale ka wada hadlaan baahiyaha maadaama oo uu dugsigu xidhanaa dayrta 2020.
- Macluumaadka la qiimaynayo waxaa kamid noqon kara waxa ardayda lagu arkay iyo imtixaanaadka uu ku galay fasalka ama online ahaan. Qiimaynta daahda waa in si dhakhso ah loo dhamaystiraa.

### Samaynta Barnaaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (Individualized Education Program, IEP)

- Ardaydu waa inay qaadataa adeegyada IEP. Waxaa adeegyada lagu bixin karaa online, fasalka dhaxdiisa, ama labadaba.
    - Arday badan ayaa wax ku baran kartaa online ama isku dar online iyo fasalka dhaxdiisa.
    - Ardayda qaar ayaa u baahan karta inay wax ku barato fasalka dhaxdiisa. Marka ay amaan tahay in sidaa la sameeyaa, dugsiyadu waa inay fasalka dhaxdiisa ku bixiyaan adeegyadan.
- Hadii ardayda koox laga dhigay amaanka dartiis, dugsiyadu waa inay ka taxadiraan inayna isku darin ardayda laxaadka la'. Go'aamada qoraalka waa in lagu sameeyaa oo ay ku salaysnaataa baahida ardayga.
- Adeegyada waxa lagu bixin karaa foolka-fool, koox yar ama fasalka dhaxdiisa.
    - Tilmaamaha Sida Gaarka ah Loo Sameeyay (Specially Designed Instruction, SDI) waxa weeye wax dhigista isbadashay si looga caawiyo inuu ardayda laxaad la' uu waxbarato.
    - Adeegyada la xidhiidha waxay ka caawiyaan ardayda waxbarasharada gaarka ah. Taageeroyinka waxaa kamid ah luuqado, dhaqaaq, gaadiid, iyo wax kale oo badan.

    - Fikirada iyo adeegyada dheeraadka ah waxay ka caawiyaan ardayda laxaadla la' habdhismeedka waxbarashada guud. Waxaa taas kamid ah taageero macalinta, foolka-fool ama iyada oo koox la yahay.
- Dhamaan shaqaaluhu waxay ka caawin karaan ardayda laxaadka la'. Shaqaalaha waxbarashada gaarka ah waa inay qorsheeyaan oo ay la socdaan hormarka.
- Qoysasku waxay ka caawin karaan ardayda inay guriga iyo online ahaan wax ku bartaan. Dugsiyadu waa inay tobobarayaan oo ay caawiyaan qoysaska marka loo baahdo.

## Taageerooyinka Teknooloojiyada iyo Teknooloojiyada Kaalmada (Technology Supports and Assistive Technology, AT)

- Teknooloojiyadu waxay ka caawin kartaa ardayda laxaadka la' waxbarashada online-ka ah, foolka-foolka ah, ama labada ah.
- Dugsiyagu waa inay siiyaan teknooloojiyad ardayda IEP leh si ay uga caawiso waxbarashada. Dugsiyadu waa inay eegaan sida teknooloojiyada dheeraad ah u caawin karaan ardayda laxaadka la'.
- Dugsidu waa inay sidoo kale ka caawiyaan qoysaska inay bartaan sida loo isticmaalo teknooloojiyada marka ardaydu ay ku jiraan waxbarashada online-ka ah.
- Waxa aad xaqiijisaa in dhamaaan shaqaaluhu garanayaan sida loo isticmaalo teknooloojiyada si ay uga caawiso ardayda laxaadka la' waxbarashada oo ayna ka qayb galaan.

## Khidada gaarka ah ee Taageerida Baahida Ardayda Ee Gaarka ah

- Ardayda waxaa dhici karta inay mushkilado lasoo daristo marka dugsiyada dib loo furayo.
    - Waxay u baahan karaan in laga caawiyo hawl maalmeedka cusub ee dugsiga, online ahaan, ama labadaha.
    - Ardaydu waa inay bartaan isticmaalka jadwalada iyo teknooloojiyada si madax banaan.

- Dugsiyadu waa inay bixiyaan taageero habdhaqan si dhamaan ardaydu wax u baran karto.
    - Shaqaaluhu waa inay diirada saaraan taageerooyinka habdhaqanka wanaagsan oo ay iska ilaaliyaan ciqaabta.
    - Taageerooyinkani waxay caawinayaan ardayda qaba baahiya dareenka.

- Ardayda qabta baahiyaha gaarka ah, khabiiro ayay tahay inay kala shaqeeyaan macalimiinta iyo qoysaska si taageero ay ugu siiyaan dugsiga, online ahaan ama labada.

## La Socodka Hormarka iyo Warbixinta

- Dugsiyadu waa inay duwaan geliyaan hormarka ardayda ee yool kasta oo IEP iyo ujeedooyinka.
- Warbixinta hormarka waa in lagu qoraa adeegyada online-ka ah ama kuwa fasalka dhaxdiisa ah.
- Qoysasku waa in loo diraa warbixinta hormarka sida ku qoran IEP.
- Qoysaska waxaa laga dalban karaa inay ka caawiyaan la socodka ardayga hormarka.

## Waxbarahsada Hore

- Waxa aad xaqiijisaa in dhamaan shaqaalaha ay garanayaan sida caruurta yaryar ee qaba laxaad la'aantu ay online ahaan, foolka-fool ama labada wax ugu baranayaan. Hawlaha waxbarashada waa inay dabacsanaadaan oo ay gaaban yihiin.
- Kooxuhu waa inay badanaa la xidhiidhaan qoysaska leh caruurta yaryar ee laxaadka la'.
- Kooxuhu waa inay la shaqeeyaan qoysaska si ay uga caawiyaan taageerada caruurta yaryar ee qaba laxaad la'aanta iyaga oo guriga jooga.
- 2 jirka qaba laxaad la'aanta ee qaata adeegyada waa in la qiimeeyaa oo IEP loo sameeyaa marka uu gaadho 3 sano jirka.

## Qalinjabinta iyo Kala Guurka Labaad

- Arday kasta oo ku jira dugsiga dhexe ama sare waa inuu leeyahay Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii Ka Danbeeya (High School and Beyond Plan, HSBP). HSBP waa inay waafaqsan tahaya adeegyada kala guurka IEP ee arday kasta oo laxaad la'.
- Kooxuhu waa inay qorsheeyaan adeegyada kala guurka ee dugsiga, online ahaan, ama labadaba. Waxaa taas kamid ah tibaaxa mihnada.
- Ardayda ku jirta dugsiga waxaa ay u baahan karaan adeegyada kala guurka. Waxaa kamid ah taas ardayda qalin jabiyay ama gaadhay 21 jirka dayrta 2020.


Washington Office of Superintendent of PUBLIC INSTRUCTION